Finland

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad tahay qof weyn (kaweyn 18 sano jir)
- aad ogeysiisay masuuliyiinta inaad rabtid inaad codsatid magangalyo caalami ah (sidoo kale loo yaqaan magan-galyo) gudaha Finland oo hadda aad tahay codsade magangalyo caalami ah.

**Waad ku badqabtaa wadankan.**

SOMALI

# WAA MAXAY SOO DHOWEYN?

Soo dhoweyn waa taageerada aad heshid codsade ahaan inta aad sugaysid in masuuliyiintu baadhaan codsigaaga magangalyada caalamiga ah. Waxa kujira xuquuqaha iyo waajibaadka lagu sharxay buug yarahan.

Finland gudaheeda, hay'adda dowladda ee mas'uulka ka ah qaabilaadda magangelyoddoonka waa Hoggaanka Socdaalka ee Finland. Sidoo kale, hay'adda ka masuulka ah baaritaanka iyo go'aan ka gaarista codsigaaga magangelyada waa isla Hoggaanka socdaalka.



Shaqaalaha Hoggaanka Socdaalka ee Finland ama shaqaalaha xarunta qaabilaadda qaxootiga ayaa ku weydiin doona in aad xaqiijiso oo aad saxiixdo caddeyn muujinaysa in aad heshay macluumaadka ku qoran buug-yarahaan. Waxaad heli doontaa macluumaad dheeraad ah marka codsigaaga la diiwaangeliyo.
**Turjumaanka** ayaa kaa caawin doona la xiriirka aad u baahan tahay ee shaqaalaha, isagoo kugula hadli doona luqad fudud oo aad fahmaysid. Turjubaanku cid kale uma sheegayo wax kasta oo aad u sheegto.

**Waxaad ka heli doontaa macluumaad ku saabsan habka codsiga magangelyada iyo xeerarka ay tahay in la raaco buug-yare gaar ah oo arrimahaas lagu sharaxay.**

Waxaad weydiin kartaa hay'addaha kale, macluumaadka iyo caawimada bilaashka ama lacag la'aanta ah. Liiska hay'addahaas kale waxaad ka heli kartaa dhammaadka buugyarahaan.

**Adigu waxaad hadda ku sugan tahay Finland, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27 ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- afarta waddan oo kale waa: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.

## Fiiro gaar ah!

Shuruucdani waxay khuseeyaan codsashada magangalyo iyo u safrida waddamada EU+ ee kale.

- **Waa inaad ka diiwaangelisaa codsiga magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timid,** haddii masuuliyiintu aanay kuu sheegin wax kale.
- **Kaliya hal waddan oo EU+ ah ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo.** Masuuliyiinta gudaha Finland ayaa raaci doona nidaamka si loo go'aamiyo in wadan EU+ ah kamasuul yahay codsigaaga mangangalyo.
- **Waa inaad joogtaa Finland. Uma safri kartid wadan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta.** Haddii aad tagtid, waxa jiri doona cawaaqib xun. Codsigaaga mngangalyo ee Finland waa la joojin karaa. Xuquuqdaada dhaqdhaqaaqa dalka kale ayaa la xaddidi karaa oo adeeggyada soo-dhaweynta ayaa la joojin karaa.

## MAXAAD HELI DOONTAA?

Haddii aad u baahan tahay lacagta qaabilaadda (vastaanottorahaa), waa in aad ka codsataa xeradaada qaabilaadda qaxootiga. Codsigaaga waa in aad ku sheegtaa caddaymaha la xiriira dakhligaaga iyo hantidaada. Iyadoo ay ku xidhan tahay duruufahaaga shakhsi iyo dhaqaale, waxaad heli doontaa:



- hoy



- agabka nadaafada gaarka ah



- cunto



- dhar



- lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah

[

Shaqaalaha xerada qaabilaadda qaxootiga waxaa ay ku weydiin doonaan su'aalo, si ay si fiican ugu fahmaan duruufahaaga shakhsi ahaaneed iyo kuwaaga dhaqaaleba.

Waa arrin suurtaggal ah, in aad ka hesho taageero iyo adeegyo keliya marka aad deggan tahay  goobta ay go'aamiyeen maamulku.


## XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay **daryeelka caafimaad ee daruuriga ah.**

*Waxaa adiga lagugu samaynayaa* baaritaan caafimaad. Dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad ayaa baarayaa caafimaadkaaga, waana ay ku caawin doonaan adiga.



## WARGALI SHAQAALAHAAGA HADDII:



- waxaad ka yar tahay 18 waxaanad timid adoon lasocon waalidkaa, kali ah ama la socda xubno kale oo qoyska ah
- aad dhaawacan tahay ama xanuunsanayso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- ay kuu sugan yihiin xubno qoyskaaga ka mid ah oo u baahan caawimo gaar ah
- aad tahay naafo
- aad dareento murugaysanaan, welwel joogto ah, aad seexan weydo ama waajahaysaa fikrado xunxun
- lagugu xad-gudbay
- aad dareentay ama dareentaa amni la'aan ama waxaad ka cabsataa qof
- aad ku jirto xaalad kale oo u baahan caawimo.

**Waxaad aamini kartaa shaqaalaha waxaanad ula hadli kartaa si furan si ay kuu caawin karaan.**

## XUQUUQDA WAXBARASHO EE CARRUURTA

Dhammaan carruurta, wiilasha iyo gabdhaha, ka yar da’da 18 sano jirka, waxaa ay xaq u leeyihiin waxbarasho.



## XUQUUQDA SHAQO IYO QAADASHADA CASHARADA

Iyadoo ay ku xiran tahay xaaladdaada, waxaad xaq u leedahay in aad ka shaqaysid Finland gudaheeda iyadoo leh shuruudo gaar ah. Shaqaalaha ayaa kusoo ogeysiin doona shuruudaha aad xaq u leedahay inaad shaqeysid.

Waxay sidoo kale kuu sheegi doonaan casharada aad dhigan kartid.







## HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA?

Masuuliyiinta ayaa kuu sheegi doona halka aad joogi doontid, sidoo kale waxaa ay kuu sheegi doonaan shuruudaha arrinkaas ku saabsan.
Goobta aad joogi doontid inta codsigaaga magangalyo caalami ah la baadhayo waxay ku xidhan tahay arrimo badan.



Hay'adaha dowladda waxay go'aamin karaan in lagugu waajibiyo inaad ku ekaato ama joogto aag juqraafiyeed cayiman, oo aanad ka bixi karin adigoo aan oggolaansho haysan.

## Fiiro gaar ah!

Masuuliyiinta ayaa go'aamin kara inaad **xaq u leedahay inaad joogtid goob gaara** (tusaale ahaan xarunta soo-dhaweynta).

Waxaad xor u ahaan doontaa inaad kabaxdid goobtaasi gaarka ah oo leh xaddidnaan gaara. Joogitaankaaga goobtaas gaarka ah ayaa waxaa loo hubin doonaa si joogto ah.



**Meel kasta oo aad joogtid, waxaad xaq u leedahay inaad:**



- **badqabto:** qofna, xataa shaqaalaha, looma oggola inuu kuu hanjabo, caayo, ama dhibaateeyo.



- **la joogto saygaaga, xaaskaaga, carruurtaada iyo walaalahaga kayar 18 ama qaraabo qof weyn ah oo u baahan daryeel joogto ah**
- **la joogto qaraabadaada,** haddii aad tahay qof weyn oo u baahan daryeel joogto ah



- hesho caawimaad si aad **ula xidhiidhid** qoyskaaga **oo aadna isku deydo inaad raadiso iyaga, haddii aadan garanayn meesha ay joogaan.**

## SHURUUDAHA CODSADE LAGU XIDHI KARO

Xadhig macneheedu waa in lagu geeyo xarun gaara oo aanad si xor ah u socon karin. Masuuliyiintu waa inay haystaan sabab sax ah oo ay kugu xidhaan. Waa inay hubiyaan in aan xalkale macquul ah laheyn xaaladaada. Booliska ama ciidanka ilaalada xudduudka ayaa tixgalin doona xaaladdaada gaarka ah ka hor go'aaminta.



Sababaha laguu xidhaayo waxay noqon karaan, tusaale ahaan:

- qodobbada muhiimka ah ee codsigaaga magangalyo (tusaale, aqoonsigaaga) lama xaqiijin karo adigoon lagu hayn.
- maad ixtiraamin waajibaadka inaad joogtid goob gaara, waxaana jirta halis inaad baxsatid markale iyo masuuliyiinta oo aan kulasoo xidhiidhi karin
- waxaad heshay go'aan in laguu gudbiyo wadan kale oo EU+ ah kana masuula baadhista codsigaaga magan-galyo waxaana jirta khatar inaad baxsato ah kahor gudbinta
- waxaad keenaysaa halis amni.

Haddii lagu xidho, waxaad qaadan kartaa racfaan. Waxaad codsan kartaa caawimo sharci oo bilaasha iyo matalaad.



## WAA MAXAY WAAJIBAADKA QEYBTA SOO-DHAWEYNTA EE MARXALADANI?

**Hoos waxa ah qaar kamida waajibaadka ay tahay inaad u hogaansantid.**



- Raac shuruucda wadankan.
- Joog Finland  gudaheeda, oo ha u safrin dal kale oo EU + ah adigoon helin oggolaanshaha maamulka.
- Haka tagin bilaa fasax goobta ay masuuliyiintu ku yidhaahdeen waa inaad joogtaa.
- U hoggaansan xeerarka goobta aad joogi doontaan.
- Ogeysii masuuliyiinta macluumaadka ku saabsan halka lagaala soo xiriiri karo.

## MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?

Masuuliyiinta ayaa qiimeyn doona xaaladaada kunasoo ogeysiin doona mid kamida tallaabooyinka ay qaadi doonaan.


**Waxaad heli kartaa caawimo kooban** tusaale haddii aad ka tagtay bilaa fasax goobta ay masuuliyiintu go'aamiyeen inaad joogtid ama aad mar horeba ka codsatay magangalyo waddan EU+ oo kale, oo aad ka soo tagtay halkaasi.

**Waxaad waayi kartaa caawimada aad helaysid** haddii aad noqotid rabshadle, haddii aad u hanjabtid dadka kale ama haddii aad jabisid sharciga goobta aad joogtid markasta ama si aad u darran.





## MAXAA DHACAYA HADDII AAD U SAFARTID WADDAN EU+ OO KALE BILAA FASAXA MASUULIYIINTA?




**Finland gudaheeda**:

- habraacaaga magangalyo doon waxaa laga yaabaa in la joojiyo.

**wadanka EU+ ee aad u safartay bilaa fasax:**

- masuuliyiintu waxay go'aansan karaan inay kugusoo celiyaan wadanka aad ka tagtay bilaa fasax.

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli **doontid noocyo kamid ah taageerada oo**
- laguuma **oggolaan doono inaad shaqeysid ama sii wadatid koorsooyinka.**

## WAXAAD KA QAADAN KARTAA RAFCAAN GO'AANKA MAAMULKA WAXAANAD HELI KARTAA CAAWIMO SHARCI

Haddii masuuliyiintu go'aamiyaan inay xaddidaan xuquuqdaada codsade ahaan oo aad aamisan tahay in tani tahay cadaallad daro, **waxaad ka qaadan kartaa rafcaan go'aanka.**

waxaad heli kartaa caawimo sharci oo bilaash ah iyo matalaad, iyadoo ku xidhan tahay xaaladaada. Tani macneheedu waa in qareen uu adiga ku caawin doono

Waxaad markasta weydiin kartaa masuulyiinta, haayadaha aan dawliga ahayn ama UNHCR wixii macluumaad muhiima, oo ay kujiraan caawimada sharci iyo matalaada bilaashka ah.

Haddii masuuliyiintu go'aamiyaan inay yareeyaan ama joojiyaan caawimada soo-dhaweynta ee lagu siiyey, waxaad wali leedahay xuquuqo gaara. Nooca taageerada aad weli heli doonto waxay ku xidhnaan doontaa xaaladdaada gaarka ah iyo baahiyahaaga.

## FAAHFAAHINTA HALKA LAGALA XIDHIIDHAYO

Haddii aad qabtid wax su'aala ama aad u baahan tahay taageero inta lagu jiro joogistaada, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha ka tirsan:

**Ha’adda arrinku khuseyso**

Xaruntaada qaabilaadda qaxootiga

**Hay’adaha kale ee arrinkaan uu khuseeyo**

Hoggaanka socdaalka

PL 10, FI-00086 Maahanmuuttovirasto, sähköposti: migri@migri.fi

**La talin sharci, caawimaad sharci iyo wakiil sharci**

Caawimaad sharci waxaa bixiya xafiisyada caawimaadda sharciga (oikeusaputoimistot), xafiisyada qareennada (lakitoimistot) iyo qareennada ama sharci yaqaannada (juristit). Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qareennada ama dadka bixiya adeegyada sharciga ah, waxaad weydiin kartaa xaruntaada qaabilaadda qaxootiga ee aad degan tahay.
Oikeuspalveluvirasto.fi/yhteystiedot

**UNHCR (Hay’adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga)** waxaa ay ilaalisaa oo difaacdaa danaha iyo xuquuqda dadka magangelyoddoonka ah iyo qaxootiga. Xafiiska UNHCR ee gobolka kuugu dhow waa: UNHCR (Hay’adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Qaxootiga)

Cinwaanka: Wenner-Gren Center, Sveavägen 166, 113 46 Stockholm, Sweden
Iimayl: swest@unhcr.org

**Meelaha kale ee lala xiriiri karo:**

Wakiilka sinnaanta iyo caddaaladda, PL 24, FI-00023 Valtioneuvosto, iimayl: yvv@oikeus.fi, www.syrjinta.fi

Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo degdeg ah ama aad ku jirtid halis, waxaad wici kartaa lambarka gargaarka degdegga ah ee lacag la’aanta ama bilaashka ah ee **112**

Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuro xuquuq ama waajibaad. Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa bixisay qaybta ugu weyn ee agabkan, waxaana EUAA ay u oggolaatay oo keliya Waddamada Xubnaha ka ah EU in ay koobiyo ama wax ka beddelaan buug-yarahan. EUAA ma qaadayo wax mas'uuliyada ama xil ku saabsan saxsanaanta, nuxurka, dhammaystirnaanta, sharcinnimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay bixiyeen Waddamada Xubnaha ka ah EU ama dhinac saddexaad oo mas'uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas'uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Hay'adda Midowga Yurub ee Magan-galyada, 2025